



**WASAARADDA**  
**GAADIIDKA & HORUMARINTA**  
**JIDADKA**

## Table of Contents

Weedha Wasiirka W. Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka JSL .....	4
Hawl-qabadka Sannadlaha ah Ee Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka Somaliland. ....	5
Mashruuca 1aad: Waddada Ceerigaabo Oo 195 km Lagu Guulaystay.....	6
Mashruuca 2aad: Dayactirka Waddada Hargeysa Ilaa Kalabaydh .....	10
Mashruuca 3aad: Waddada Marinka Berbera (Berbera Corridor).....	13
Mashruuca 4aad: Dhismaha Waddada Lawyo-cado, Fardaha Ilaa Boorama .....	20
.....	20
Mashruuca 5aad: Dayactirka Biriishyada Dubur Iyo Kala-jab.....	22
Mashruuca 6aad: Shaqada Joogtada Ah Ee Buurta Sheikh .....	25
Mashruuca 7aad: Dayactirka Waddada Isku Xidha Laascaanood Ilaa Burco. ....	27
Mashruuca 8aad: Dayac-tirka Waddada Cad ee U Dhaxaysa Hargaysa Ilaa Salaxlay .....	30
Mashruuca 9aad: Waddada Isku Xidha Wajaale iyo Kala-baydh .....	33
Mashruuca 10aad: Dhismaha Biriishka Isku Xidha Jaamacadda Camuud iyo Magaaladda boorame .....	36
Mashruuca 11aad: Dhismaha Wadada Baligubadle.....	39
Mashruuca: 12aad: Gaadiidka Shaqada ee Loo soo libiyey Wakaaladda Horumarinta Wadooyinka JSL.....	41
Mashruuca: 13aad: Hubinta Tayada, Badqabka Gaadiidka .....	45
Mashruuca 14aad: Siyaasada gaadiidka dawladda .....	53
Mashruuca 15aad: Xeerka Gaadiidka Badda.....	55
Mashruuca 16aad: Qalabka Xadidaada Xawaaraha Gaadiidka .....	56
Mashruuca 17aad: Xeerka Waddo Marista (Wax ka bedel iyo Kaabis).....	59
Mashruuca 18aad: Tayaynta Shaqaalaha.....	60
Mashruuca 19aad: Qalabka la socodka Gaadiidka dawladda (GPRS) .....	62

Mashruuca 20aad: Xuska Maalinta Caalamiga ah ee Badbaadada Waddooyinka .	65
Mashruuca: 21aad: Dhismaha Barxada Xarunta Waaxda Gaadiidka .....	67
Mashruuca 22aad: Wacyigalinta Waddada Isku Xidha Hargaysa iyo Wajaale .....	68
Mashruuca: 23aad: Dugsiga tababarka wadayaasha/macalimiinta wadayaasha.	73
Mashruuca: 24aad: Dayactirka Biriishka 2aad ee Magaalada Burco.....	76
Mashruuca 25aad: Xasuusta Malinta Caalmiga Ah Ee Dadka Shilalka Gaadiidku Ku Waxyeeleobay. ....	78

## Weedha Wasiirka W. Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka JSL

Horumar ka horeeya waddooyinku ma jiro, Somaliland waxa ay leedahay qorshaha isku xidhka waddooyinka ee 2030 (Road Network vision 2030), tirada guud ee aan rajaynayno in aynu dhisno mustaqablka waa 9030KM (Sagaal kun iyo Sodon KM) oo Waddooyin ah, waxaana inoo dhisan hada ilaa 1000KM (Kun Killomitir), taas oo ka dhigan in aynu dhisnay wax ka yar 12% waddooyinka dalku u baahan yahay. Waxaan mahad wayn u celinayaa dhamaan shacab waynaha jamhuuriyada Somaliland gudo iyo dibedba, sida ku cad waxqabadka guud ee JSL waxay xukumaddu markasta u taagantahay hirgalinta iyo habsami u socodka guud ahaan horumarka dalkeena.

Waxaan u soo jeedinayaa dhammaan shacabka reer Somaliland haddii gacmaha lays qabsado in aynu hirgalin karno, ama gaadhi karno himiladeena fog ee dhisida kaabayaasha dhaqaalaha, kaasoo ah xadhiga isku xidhaaya hantida iyo dhaqaalaha dhammaan tuulooyinka, degmooyinka, gobollada iyo ilaha kala duwan ee aynu ka helno dhaqaalaha waddankeena. Waxaan kale oo aan u mahad celinayaa dhammaan shaqaalaha ka qaybqaatay dhamaystirka iyo dedaalka Mashaariicda ay fulisay Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka iyo sidoo kale Wakaaladda Horumarinta Waddooyinka, oo ka kooban 25 Mashruuc.

Markale waxaan u mahad celinayaa Masuuliyiinta Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka iyo Masuuliyiinta Hay'adda horumarinta Waddooyinka oo iyagu ah tiir dhexaadka Horumarka ay Wasaaradda iyo Hay'addu ku talaabsatay Sannadka 2019.



**C/laahi Abokor Cismaan**

***Wasiirka Wasaarada Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka JSL***

## Hawl-qabadka Sannadlaha ah Ee Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka Somaliland.

Wasaarada Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka Somaliland oo uu Madaxweynaha JSL Mudane Muuse Biixi Cabdi ku aasaasay Xeerka Lr 01/2018, isaga oo ka duulaya baahida loo qabo in la helo Wasaaradd u xilsaaran Gaadiidka iyo Jidadka oo Baahi joogta ah loo qabo si wax looga qabto dayac iyo duruufo gaarka ah ee Gaadiidka iyo Jidadka ka muuqda, isla markaana la isugu keenay waaxo iyo hay'addo kala duwan oo ka kala tirsanaa Wasaaraddo kale.

Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka JSL C/laahi Abokor Cismaan, Wasiir ku xigeenkiisa Sahal Maxamed Jaamac, Agaasimaha Guud Cumar C/laahi Aadan, iyo Maareeyaha Hayada horumarinta waddooyinka Axmed Yusuf Maxamed oo kaashanaaya Masuulyiinta Wasaaradda Gaadiidka iyo Wakaaladda Horumarinta Wadooyinka waxay bilaabeen Mashaariic kala duwan, iyada oo wakhtigaasi ay dhinac socotay dib u habeynta iyo isku xidhka hawl-wadeenada lagu mideeyay Wasaaradda.



**Sahal Maxamed Jaamac**

**Wasiir Ku xigeenka Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka**

## Mashruuca 1aad: Waddada Ceerigaabo Oo 195 km Lagu Guulaystay.

Mashruuca Waddada Ceerigaabo waxaa maalgalinaya Xukuumadda Soomaliland, waxaana fulinaya Wasaaradda Gaadiidka iyo horumarrinta Jidadka gaar ahaan Wakaaladda Horumarinta Waddooyinka Soomaliland.

Waddooyinku waxay ka mid yihiin kaabayaasha dhaqaale ee ugu muhiimsan ee ay Dalalka adduunku leeyihiin. Waddooyinka la sameeyaa waxay faa'idooyin badan u leeyihiin dadweynaha isticmaala, waayo waxay u sahlayaan inay si fudud ku gaadhaan gobolladda, degmooyinka iyo dalalka aynu jaarka nahay. Sidoo kale waddooyinka sida fiican loo dhisay waxay yareeyaan shilalka iyo kharashka ku baxa dayactirka baabuurta.

Haddaba si loo gaadho faa'iidooyinka kala duwan ee ay leeyihiin waddooyinku, waxay hirgaliyeen Wasaaradda iyo Wakaaladda Horumarinta Waddooyinku 42 KM oo laami ah sanadkan 2019.

Waddada ceerigaabo dhererkeedu wuxu dhan yahay 274 KM, waxa wasaarada gaadiidku ay la wareegtay iyada oo 94 KM oo waddo laami ahi dhammaystiran tahay.

Sannadkii 2018 wasaaraddu waxay dhammaystirtay 59 KM, halka sannadkan 2019, ay dhistay 42 KM taas oo wadar ahaan noqonaysa 101 KM, marka loo geeyo 94 Km hore u dhisna waa 195 Km.

Qorshaha sannadka cusub ee 2020-2021 waxaanu ku rajo waynahay in aanu dhisno 60Km halka sanadka 2021-2022 aanu rabno in aanu dhisno 17Km ee hadhay oo Wadadu Sannadkaas dhammaato.



**Madaxweyanaha JSL Mudane Muuse Biixi Cabdi iyo Wasiirka W. Gaadiidka& H. Jidadka oo socdaal ku maraya goobaha ay ka socoto shaqada dhismaha Waddada isku xidha Gobolladda Togdheer iyo Sanaag.**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Waddada isku xidha Gobolladda Togdheer iyo Sanaag.**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Waddada isku xidha Gobolladda Togdheer iyo Sanaag.**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Waddada isku xidha Gobolladda Togdheer iyo Sanaag.**



**Shaqaalaha iyo Gaadiidka Cagafyada ee Waddada isku xidha Gobolladda Togdheer & Sanaag.**



**Shaqaalaha iyo Gaadiidka dhisaaya Waddada isku xidha Gobolladda Togdheer iyo Sanaag**

## Mashruuca 2aad: Dayactirka Waddada Hargeysa Ilaa Kalabaydh

Mashruuca Dib u dhiska waddada Hargeysa-Kala baydh oo ah (60km) waxaa dhisaysa Shirkadda Somaliland Hono Group (Contractor Somaliland Hono Group) Waxa maalgaliyey Midawga Yurub, Jarmalka iyo RDA (Funded by European Union (EU), Federal Ministry for Economic Cooperation and Development (BMZ) and Road Development Agency).

Mashruuca dayactirka waddada isku xidha Hargeysa iyo Kalabaydh kormeerkiisii u danbeeyay markii uu dhamaaday waxa la saxeexay heshiiska shirkadda dhisaysa iyo Wakaaladda Horumarinta Wadooyinka Soomaliland (RDA) December 3deedii 2018.

RDA waxay masuul ka tahay kormeerka iyo indha-indhaynta siday hawluhu u socdaan, GIZ doorkeedu waa caawimo iyo wixii farsamo ah).

Ugu dambayn madaxweynaha qaranka ayaa dhagax dhigay mashruucan taariikhdu markay ahayd 07 Feb 2019.

Asphalka ayaa la dhigay 39.400Km, Calaamadinta waddada (Road furniture) waxay dhan tahay 25 Km, Ujeedada ugu weyn ee calaamadinta wadadu waa in la xadido xawaaraha gawaadhida iyo kala hagistooda, si loo yareeyo khasaaraha iyo halista shilalka.



**Madaxaweynaha JSL Mudane Muuse Biixi Cabdi iyo Wasiirka Deegaanka, Wasiirka Gaadiidka, Afhayeenka Madaxtooyada iyo Agaasimaha Guud ee W. Gaadiidka oo ku sugan goobta lagu daahfuraayey bilawga Dayactirka Waddad u dhaxaysa Hargaysa ilaa Kalabaydh.**



**Waddada u dhaxaysa Kalabaydh iyo Hargaysa**



**Waddada u dhaxaysa Kalabaydh iyo Hargaysa**



**Waddada u dhaxaysa Kalabaydh iyo Hargaysa**



**Maareeyaha Wakaaladda Horumarinta Wadooyinka (RDA), Badhasaabka Gobolka Gebilay, Maayarka Degmada Gebilay iyo Injineerada dhismaha Waddada Hargaysa ilaa Kala-baydh**

## Mashruuca 3aad: Waddada Marinka Berbera (Berbera Corridor)

Madaxweynaha JSL, wuxuu dhagax dhigay dhismaha jidka Berbera Corridor (Hargeysa - Wajaale) 28 Feb 2019.

Dhismaha Jidka isku xidhaya Berbera ilaa Wajaale ayaa la bilaabay 10/05/2019, loona qoondeeyey inuu dhammaado 25/04/2021, waxaa maalgalinaysa Dawladda isu taga Imaaraadka Carabta Abu Dubai (UAE), waxaana fulinaysa Shirkada Nael & Bin Harmal Hydroexpor Establishment (NBHH) oo laga leeyahay isla Wadankaas, halka ay dhinaca dhismaha kala talinayso shirkada ConserConsultant.

Wakhtigaa mashruucu socday waxyaabaha la qabtay waxa ka mid ah Qiimeynta biriishka Dacarbudhuq (Geotechnical Investigation).

Wajiga 1 aad waxa Jidka la qondeeyey in la dhiso 160.45 km halka 11.3 M ballac ah, 39 CM hoos loo qodayo (Excavation), iyada oo la banaynayo oo meesha laga saarayo wadadii hore, waxa kale oo la dhisi doonaa 4 Biriish iyo 16 biriish oo yar yar (Culvert) oo jidku yeelan doono.

- Banaynta iyo goynta dhirta waddada hareeraheeda 144 km
- Dhismaha waddada ku meel gaadh ah (detour road) 15km
- Qaadida waddadii hore u jirtay 20km
- Dhismaha waddada cusub way socotaa
- Dhererka waddada Berbera corridor waa 241km.



**Xubno ka mida Golaha Wasiiradda JSL iyo Khabiiradda dhisaaya Wadada Marinka Berbera (Berbera Corridor) oo ku suugan Xarunta Shirkada dhisaaya Wadadaas oo ku Taal Degmada Laas-geel**



**Khabiirka dhisaaya Waddada Marinka Berbera (Berbera Corridor) Eng Tayasiir, Lataliye Eng Maxamed Yaxye, iyo Eng Daahir oo ku sugan goobaha ay ka socoto dhismaha Waddada.**



**Wasiirka Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka iyo Khabiirada dhisaaya Waddada Marinka Berbera (Berbera Corrido) oo ku sugan goobha ay ka socoto dhismaha Waddada.**



**Xubno ka mida Golaha Wasiiradda JSL iyo Khabiiradda dhisaya Waddada Marinka Berbera (Berbera Corridor) oo shir ku wada yeeshay Xarunta Shirkada dhisaysa Waddadaas oo ku Taal Degmada Laasgeel**



**Warshadda Asphalt Plant ee ku rakiban Xarunta Shirkadda dhisaysa Waddada Marinka Berbera (Berbera Corridor)**



**Waddadii hore ee Marinka Berbera oo la laabay, si meesha loog saaro**



**Waddadii hore ee Marinka Berbera oo la laabay si meesha loog saaro.**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Wado ku meel gaadh ah oo loo sameeyay Gaadiidka kadib markii Wadadii hore ee Marinka Berbera la laabay si meesha looga saaro**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Waddada Cusub ee Marinka Berbera (Berbera Corridor) oo hoos loo qodayo 39 CM si loo soo dhiso.**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Ciida Carokaawada ee la dhigaayo Waddada Marinka Berbera (Berbera Corridor)**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Waddada cusub ee Marinka Berbera (Berbera Corridor) oo shaqo ka socoto.**



**Waddada cusub ee Marinka Berbera (Berbera corridor) waxay noqonaysaa mid dhulka ka saraysa**



**Waddadii hore oo la laabay si meesha looga saaro**

## Mashruuca 4aad: Dhismaha Waddada Lawyo-cado, Fardaha Ilaa Boorama

Wasaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka, Wakaaladda Horumarinta Waddooyinka Soomaaliland iyo Bangiga Horumarinta Afrika (ADB) ayaa heshiiska mashruuca kala saxaaxday, waxaa uu baanku qorsheeyay inuu dhiso waddo laami ah oo isku xidhi doonta Lawyo'cado, Fardaha iyo Boorama.

Koox khubaro ah oo ka socota bangiga, waxay yimaadeen Somaliland 20 -23, July 2019 iyagoo u yimid socdaal xaqiiqo raadis ah, islamarkaana Wasaaradda Gaadiidka iyo horumarinta jidadka la saxaaxday heshiis wadadaasi ku saabsan, waxaanay dhagax-dhigeen wadada. Cabirka Wadada ee la dhisayo waxa lagu qiyaasay dhererkeeda ilaa 300 km.

Waxaa la xayaysiiyay Consultant Companies qabanaya shaqada Daraasada waddada si loo helo Shirikad (Company) Caalami ah oo inoo sameeya daraasada, waxaana soo xaraystay 63 Shirikadood (companies), waxaana laga soo dhax xulay 6 shirkadood oo mar labaad ku tartami doona "RFP", waxaana hada socda kala xulida shirkadaha, iyadoo laga rabo shirkada ugu awooda badani inay soo hadho.

Ugu danbayn Shirkadda ku guulaysata waxaa Heshiiska lala saxaaxday doonaa Feb 2020, shaqadana Daraasada ayey bilaabi doontaa isla maalintaas.

Daraasadu waxay socon doontaa mudo 9 bilood ah waxaanay daraasayn doono wax kasta oo shaqadaas daruuri u ah.



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Wasiirk Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadk, Wafti ka socda Banka Horumarinta Afrika (African Development Fund) Sulaadiin, iyo Aqooyahanka Gobolka Awdal oo dhagax dhgaaya wejiga hore ee heshiiska dhismaha Waddada Borame ilaa Lawyo-cado**



**Wasiirk Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka JSL oo uu duleedka Magaalada ku soo dhaweyay Sheikhul beledka Magaaladda Borame**



**Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka iyo Wakaaladda Horumarinta Waddooyinka JSL oo la kulmay 6 Shirikadood ee soo hadhay oo ah Shirikadaha (Consulting Company) qaban lahaa shaqada Daraasada waddada**

## Mashruuca 5aad: Dayactirka Biriishyada Dubur Iyo Kala-jab

Biriishyadu waxa ay halbowle u yihiin wadada inteeda kale, Wasaaradda iyo Wakaaladda Horumarinta Wadooyinku waxa ay xooga saareen ilaalinta iyo dayac-tirka Biriishyada.

Biriishka Dooxa Dubureed oo u dhaw magaaladda Sheikh Waxa uu ka dalooshamay laba meelood oo dusha sare ee shubka ah, waana la dayactiray, Biriishka Kal-jab hal meel ayuu isna ka dalooshamay oo shubka sare ah, waana la dayactiray, waxaana maalgaliyey Xukuumada Somaliland, iyada oo ay fulisay W. Gaadiidka iyo horumarrinta Jidadka gaar ahaan Wakaaladda Horumarinta Wadooyinka Soomaaliland.



**Wasiirka gaadiidka, Badhasaabka Gobolka Saaxil, Maayarka Degmada Sheikh, Khabiirada dhismaha Waddada ee RDA iyo xubnka ka mid Shirkada dayactirka Biriishka, oo ku sugan Biriishka Dooxa Dubur**



**Biriishka Dooxa Dubur**



**Wasiirka gaadiidka, Badhasaabka Gobolka Saaxil, iyo xubno ka mid Shirkada dayactirka Biriishkawaday oo ku sugan Biriishka Dooxa Dubur, oo dusha ka dalooshamay**



**Biriishka Dooxa Dubur oo godkii dusha ka dalooshamay laga hagaajiyey**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

### **Biriishka Dooxa Kala Jab oo godadkii laga hagaajiyey**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

### **Biriishka Dooxa Kala Jab**

## Mashruuca 6aad: Shaqada Joogtada Ah Ee Buurta Sheikh

Buurta sheikh, waxaa had iyo jeer ku soo shalwadda dhagxaan waawayn, iyo ciid, kuwaas oo sababa in ay xidhmaan dhammaan biyo mareenada, Haddaba Wasaaradda Gadiidka iyo Horuumarinta Jidadku iyada oo kaashanaysa Wakaaladda Horumarinta Wadooyinka, ayey u dirtaa shaqaale isugu jira ingineero iyo shaqale hoosaad oo qalabkooda wata, si ay shaqo uga soo qabtaan dawga sheikh oo ku dhawaadaa mararka qaar inuu kala xidho dalka intiisa kale.

Shaqada buurta sheikh waa joogto, gaar ahaan xili roobaadka oo u baahan ka warhayn joogto ah. Guud ahaan wadada dawga sheikh oo dhererkiisu dhan yahay 9 Km.

- Waxaa laga nadiifiyey dhagxaantii iyo ciidii uu daadku ku soo shalwiya laamiga iyo biyo mareenadda, meelaha wadada dalooshama waa la hagaajiyaa.
- Waxaa laga jaray dhirtii ku taalay gooladaha ee qarinarsay gaadiidka.
- Waxaa la nadiifiyay dhamaan buundooyinka hoostooda si qulqulka biyuhu aanay u hakan.

Guud ahaan shaqadu waxay u socotaasi guul ah, oo raali galisa bulshada u kala socota waddanka intiisa kale.



**Waddada Dawga Buurta Sheikh**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Wasiirka Gaadiidka Iyo Horumarinta Jidadka JSL Badhasaabka Gobolka Saaxil Masuuliyiinta Shirkada Tawfiiq, Khabiirada Dhismaha Ee Wakaaladda Waddooyinka JSL Oo Ku Sugan Waddada Dawga Buurta Sheikh Oo Shaqo Ka Socoto.**

## Mashruuca 7aad: Dayactirka Waddada Isku Xidha Laascaanood Ilaa Burco.

Tuulo-samokaab ilaa Adhicideeye, Dhammaan waxyeelooyinkan soo gaadhay laamiga wayn ee isku xidhaya wadanka qaybo badan, waxaa uu bilaabmay 2018 iyadda oo ay sababeen roobab xoogan oo halkaas ka da'ayey Sanadkasta wakhtiga Dayrtu marka uu ka bilaabmo gobolka Sool waa sii kordhaysay, run ahaantii wakhtigaas waxyeeladu waa yarayd waxayna ahayd mid ay ku bixi karaan kharash aan sidaa u badnayn.

Guud ahaan Roobabkii iska daba da'ayay waxay gaadhsiiyeen waxyeelo aad u wayn laamiga u dhaxeeya Burco ilaa laascaanood, waxay baabiiyeen, Garbaha wadada, Dhinacyada laamiga, Moosaska biyaha ka celiya.

Sannadkan waxaan dayactir balaadhan ku samaynay inta u dhaxaysa Tuulo-samokaab ilaa Adhicideeye oo waxa la dayactiray dhamaan dhulkii ay waxyeeladu soo gaadhay.

Wax qabadka la sameeyay waxaa ka mid ah.

- a) Garbaha laamiga - Shoulders
- b) Dhinaca laamiga ee biyuhu u dhacayaan - Edges
- c) Mooskii biyaha ka qabanaayay - Dykes
- d) Dhagaxii ku samaysnaa - Ripraps
- e) Carro buuxis - Backfil
- f) Hogag ka qodma laamiga dhexdeeda iyo qaabkeeda oo is badalay - Potholes, Rutting
- g) Jaris dhirta laamiga soo gashay. -Bush Clearing

Guud ahaan dhulka waxaa soo gaadhay waxyeelo aad u wayn una baahan in si dagdag wax looga qabto.



**Waddada u dhaxaysa Tuulo-samokaab ilaa Adhicideeye ee Gobolka Sool oo daadadku qodeen**



**Wasiir Kuxigeenk Wasaaradda Gaadiidka iyo horumarinta Jidadka JSL oo dhagax dhigay dib u dhiska Waddada u dhaxaysa Tuulo-samokaab ilaa Adhicideeye ee Gobolka Sool oo daadadku qodeen.**



**Waddada u dhaxaysa Tuulo-samokaab ilaa Adhicadeeye ee Gobolka Sool oo la buuxinayo hareeraheeda.**



**Waddada u dhaxaysa Tuulo-samokaab ilaa Adhicadeeye ee Gobolka Sool oo la buuxinayey hareeraheeda Lana balaadhiyey.**

## Mashruuca 8aad: Dayac-tirka Waddada Cad ee U Dhaxaysa Hargaysa Ilaa Salaxlay

Wadadan oo ka mid ah waddooyinka ay Wasaaradda iyo wakaalada horumarinta waddooyinka ee (RDA) ay ku sameeyen dayactirka kasoo bilaabmay 08/06/2019) oo laga bilaabay kaantaroolka salaxlay ilaa magaalada toon sokadeeda oo ahayd intii ugu dhibka badnayd wadada uguna googo'a badnayd gaadiidkana dhib badan kuhaysay ayaa lagu sameeyay dayactir kooban kaasoo qaatay mudo ku dhaw laba bilood.

Sidoo kale, Waddadan oo ah waddooyinka bulshadu doorka muhiimka ah ka qaadatay, ayay wasaaradda iyo wakaaladda horumarinta waddooyinku ka caawiyeen gudida waddada, wajiga sadexaad ee Qoolcaday – Salaxlay oo dhan 21 KM, iyada oo wasaaradu qalab iyo aduunba wixii ay awoodaysay ku wareejisay gudida horumarinta waddadaas.



**Wafti uu hogaaminaayey Wasiirka Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka JSL oo ku sugan goobaha ay ka socoto dhismaha Wadada Cad.**



**Dayac tir lagu sameeyay Waddada Salaxley ee Waddada cad qaybaha dhisan oo dhaawac soo gaadhay**



**Dayac tir lagu sameeyay Waddada Salaxley ee Waddada cad qaybaha dhisan oo dhaawac soo gaadhay**



**Dayac tir lagu sameeyay Waddada Salaxley ee Waddada cad qaybaha dhisan oo dhaawac soo gaadhay**

## Mashruuca 9aad: Waddada Isku Xidha Wajaale iyo Kala-baydh

Waxa dayactir lagu sameeyay waddada halbwalaha ah ee u dhaxaysa wajaale iyo kala-baydh, waxaana waxyeelo soo gaadhay buundooyinka saara biyaha oo dusha dhaawac ka soo gaadhay markii ay mareen Baabuur xamuul ah oo wada badeecad xad dhaaf ah oo dhaawac u gaystay laamiga iyo buundooyinkaba.

Hadaba si uu isku socodku u fududaado oo aanu kala go ugu dhicin Gaadiidka isaga gudbaaya labada Wadan ee Itoobiya iyo Soomaaliland ee ganacsiga kala gudbinaaya, waxaa la sameeyay hawgal shaqo oo dagdag ah, waddo carotuul ah oo dhinac marta wadada laamiga ah ayaa la sameeyay.



**Mid ka mid ah buundooyinka saara biyaha eeu dhaxeeya Kala-baydh iyo Wajaale oo dhaawac dusha ka gaadhay**



**Calaamadaha Gaadiidka loo sameeyay si ay uga baydhaan buundada**



**Dhawr meelood oo noocan ah ayey ka dalooshantay dusha sare Buundadu.**



**Carotuulka la dhigay waddada ku meelgaadhka ah ee loogu talo galay in gaadiidku maraan inta dayactirku socdo.**



**Waddada ku meelgaadhka ah ee loogu talo galay in gaadiidku maraan inta dayactirku socdo**

## Mashruuca 10aad: Dhismaha Biriishka Isku Xidha Jaamacadda Camuud iyo Magaalada boorame

Biriiskan oo oo isku xidhi doona Jaamacada Camuud iyo Magaalada Boorame oo uu uu Madaxweynaha Soomaaliland mar uu Safar shaqo ku tegay halkaasi uu ku dhagax dhigay, Dhismihisa waxaa la bilaabay 12.10.2018 Waxaa maalgalintiisa bixiyey Madaxweynaha JSL, Mudane Muuse Biixi Cabdi.

Waxa wada fulinaaya dhismihisa Wasaarada Gaadiidka & H.Jidadka iyo Wakaaladda Horumarinta Waddooyinka Soomaaliland iyo Jaamacada Camuud.

Wuxuu dhamaaday 30.12.2019 Sidii uu qorshuhu ahaa.

Biriishkaas oo cabirkiisu dhan yahay 28m dherer, 10m Ballac.



**Madaxweynaha JSL Mudane Muuse Biixi Cabdi, Maareeyaha Wakaaladda Waddooyinka, Guddoomiyaha Jaamacadda Camuud, iyo Masuuliyiin kale**



**Biriiska isku xidha Jaamacada Camuud iyo Magaaladda Boorame oo dhammaad ku dhaw**



**Biriiska isku xidha Jaamacada Camuud iyo Magaaladda Boorame oo dhamaaday**



**Biriiska isku xidha Jaamacada Camuud iyo Magaaladda Boorame oo dhamaaday**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Biriiska isku xidha Jaamacada Camuud iyo Magaaladda Boorame oo dhamaaday**

## Mashruuca 11aad: Dhismaha Wadada Baligubadle

Waddada iskuxidha Baligubadle iyo Hargaysa oo ah wado halbowle ah oo shacabka deegaankaasi aad ugu baahan yahay islamarkaa ay gacan ka geysteen dadka deegaanku oo ay samaysten guddi horumarineed, ayey Wasaaradda Gaagadiidka Horumarinta Jidadka iyo Wakaaladda Waddooyinka Soomaaliland gacan ka geysteen dhismaha waddadaasi oo ay bixiyeen kharashka 13 KM oo carokaawo ah sidoo kalena Wakaladda Horumarinta Waddooyinku waxay ku caawisay Qalab, Gaadiid iyo Shidaal ka hawlgala wadadaas dhismaheeda kuwaas oo ah hawl-wadeenada iyo Gaadiidka shaqada ee Wakaaladda Horumarinta.



**Xubno ka mida golaha Wasiiradda oo ku sugan goobta uu ka socdo dhismaha Waddada Baligubadle**



**Waddada Baligubadle oo qaybaha dhismuhu ka socdo caro kawadii la dhigay**



**Wasiirka Gaadiidka iyo Horumarinta Jadadka JSL iyo Xildhibaan Golaha Wakiilada ah, iyo Guddoomiyahii hore ee G Maroodijeex.**

## Mashruuca: 12aad: Gaadiidka Shaqada ee Loo soo libiyey Wakaaladda Horumarinta Wadooyinka JSL

Wasaaradda Gaadiidka Iyo horumarinta Jidadka Soomaaliland iyada oo ka duulaysa duruufaha dhaqaale ee hadheeeyay dhismaha waddada Ceergaabo waxa ay hindistay in Banka Soomaaliland siimaalgaliyo Qalab iyo Gaadiid lagaga shaqeeyo Waddadaasi, waxaanay soo iibisay iyada oo raacaysa nidaamka iibsiga Macadaadka (Machineries) loo maro si waafaqsan Xeer L/r 82/2018 xeerka Qandaraasyadda Qaranka iyo Siyaasada Gaadiidka Dawladda 2018 ee lagu ansixiyey kalfadhigii 22aad ee Golaha Wasiirada (Qodobkiisa 3.1.2) oo waafaqsan qaabka iibsiga gaadiidka dalka dibadiisa, Gaadiid kala duwan oo kala ah:-

1 Booyada daamurka, 2 Booyadood oo nooca biyaha ah oo mugeedu yahay 20 Metre cubic iyo 1 booyad shiidaal, 5 Iskarogo oo mugeeduyahay 24 ton, 2 cagaf“grader”, 1 Karasharka guur guur ah (Mobile Crusher),1 roller, 3koonteener oo shaqaaluhu seexo midina Xafiis yahay, 1 Mashiin laydh oo 550 KVA, iyo 1 cagaf baldawsar D8 oo ah nooca waa wayn.



**Gaadhiga uu Saaran yahay Karasharku (Mobile Crusher)**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Gaadhiga uu Saaran yahay Karasharku (Mobile Crusher) oo hawlgal shaqo ku jira**



**Booyada Daamurka, Booyada Yare Shidaalka iyo iska Rogooyinka**



**Baabuurta Iska Rogooyinka oo Waddada dhhigaaya Ciida**



**Gaadhiga loogu talo galay in uuxanbaaro Cagafyada**



**Gaadiidka Iskarogoyinka Cusub iyo Darewaliintooda**



**Gaadiidka Cagafyada**

## Mashruuca: 13aad: Hubinta Tayada, Badqabka Gaadiidka

Hawl qabadka 13 aad ee W. Gaadiidka&H. Jidadka waxa u qorshaysnaa in ay hirgaliso qorshaha lagu hubinayo tayada gaadiidka dadweynaha, si loo yareeyo shilalka gaadiidka.

Waxay wasaaradda iyo gudiga qandaraasyada qaranka soo xuleen 7 geerash (workshop) oo ku yaala dhammaan gobollada dalka, oo qaban doona hawsha hubinta tayada gaadiidka dadweynaha (Vehicle inspection) si waafaqsan qodobka 47 aad ee xeerka wada marista xeer L/r 56 / 2013.

7 aad xarumood oo laba ka mid ah laga hirgalin doono caasimadda, halka shanta xarumood oo kalena laga hirgalin doono gobolada kala duwan ee dalka, gaar ahaan magaaloyinka, Burco, Borama, Berbera, Laascaanood iyo Ceerigaabo. Dhammaan Geerashyadaas samaynaya badqabka gaadiidka oo marka magacooda la soo gaabiyo loo bixiyay Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka (BBG), hada waa diyaar, waxayna diyaar u yihiin in adeegaas ay bilaabaan sanadka cusub ee 2020 insha alaaah.



**Wasiirka Gadiidka iyo Horumarinta Jidadka oo Sawir la galay Markii ay Gudiga Qandaraasyada Qaranku Shaaciyeen Shirkadaha dhisaaya Xarumaha Hubinta bedqabka Gaadiidka**



**Xarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka (BBG) Ee Galbeedka Hargeysa**



**Mid ka mida Xarumaha Hubinta bidqabka Gaadiidka Hargaysa ee Al Sharaf**

**BAADHITAANKA  
BEDQABKA  
GAADIIDKA (B.B.G)**

VEHICLE SAFETY INSPECTION TEST



**XARUNTA HASS** » **BARRIGA HARGAYSA**

Xarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka (BBG) Ee Bariga Hargeysa

© Communication Office of the MoTRD, Somaliland.



© Communication Office of the MoTRD, Somaliland.



MoTRD, Somaliland.





# BAADHITAANKA BEDQABKA GAADIIDKA

VEHICLE SAFETY INSPECTION TEST



AL-NAFOORA & DHOORE M.O.T (Gobolka Togdheer-Burco)

## Xarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka (BBG) Ee Burco



Xarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka (BBG)Ee BurcoXarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka (BBG) Ee Burco



**Xarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka (BBG) Ee Burco**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Xarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka (BBG) Ee Burco**



# BAADHITAANKA BEDQABKA GAADIIDKA

Vehicle Safety Inspection Test



**ALPHA MOT COMPANY (Berbera-Gobolka Saaxil)**

**Xarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka (BBG) Ee Berbera**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**(BBG) Ee Berbera Boodhka Xarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka**



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.



**Xarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka (BBG) Ee Berbera**



**Xarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka**

**BAADHITAANKA  
BEDQABKA  
GAADIIDKA (B.B.G)**

**Vehicle Safety Inspection Test**

**AMAL**

**XARUNTA JIBRIIL  
BORAMA, G.AWDAL, SOMALILAND**

Xarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka (BBG) Ee Boram

**BAADHITAANKA BEDQABKA  
GAADIIDKA**

**VEHICLE SAFETY INSPECTION TEST**

**XARUNTA HASS** **LAASCAANOOD**

Xarunta Baadhitaanka Bedqabka Gaadiidka (BBG) Ee Laascaanood

## Mashruuca 14aad: Siyaasada gaadiidka dawladda

Siyaasada gaadiidka dawladda oo lagu ansaxiyey kalfadhigii 20 aad ee golaha wasiirada, taas oo ujeedadeedu ahayd Maamulka gaadiidka dawladda, sida dayactirka, shidaalsiinta, iyo xadidaada wakhiga dhaqdhaqaaqa gaadiidka dawladda wixii ka baxsan saacadaha shaqada.

Sidaas darteed wasaaradu waxay samaysay qorshe dhamaystiran oo suurta galinaya inay yeelato awood iyo karti ay ku fulin lahayd maamulka gaadiidka dawladda.

Wasaaraddu waxa ay u fulinaysa siyaasadan gaadiidka dawladda si ka fiirsasho baddani ku dheehan tahay waxayana ugu horeyn la soo wareegtay liiska darawaliinta gaadiidka dawlada oo dhan 423.

Sidoo kale wasaaraddu waxay samaysay nidaam casriya (Website reporting) oo wasaaradaha iyo hay'adaha dalku kusoo gudbin karaan xaalada gaadiidkooda, iyada oo dhamaan laamaha dawlada loo qaybiyey fure iyo tirsi sireed ay ku soo gudbin karaan warbixinta gaadiidka ee maalinlaha ah (User Names, and passwords).

Waxaa lagu tababaray hawladeenadii ka shaqayn lahaa hawshaasi oo ka socda dhamaan Wasaaradaha iyo Hay'addaha Dawladda.



**Agaasimaha Guud ee W. Gaadiidka & Agaasimaha Hay'adda Shaqaalaha, Agaasimaha Waaxda Gaadiidka ee W. Gaadiidka**



**Agaasimaha Guud ee W. Gaadiidka & Hawlwadeenada Waaxaha Wasaaraddaha iyo Hay'adda Madaxa Bannaan**



**Agaasimaha Guud ee W. Gaadiidka & Hawl-wadeenada Waaxaha Wasaaraddaha iyo Hay'adda Madaxa Bannaan**

## Mashruuca 15aad: Xeerka Gaadiidka Badda.

Wasaaradu waxay curisay Xeerka Gaadiidka Badda oo horay Dalka uga jirin, iyada oo la adeegsanayo khabaro aqoon balaadhan u leh badda isla markaana waxa la qabtay aqoon is waydaarsigii koowaad ( Validation work ) lagu lafo gurayo xeerkan, iyada oo marki labaadna loo gudbiyay xafiiska Garyaqaanka Guud ee qaranka, si uu u hubiyo , isla markaana waxa la qaban doonaa aqoon is waydaarsigii labaad ( Second validation workshop ) iyada oo ugu dambayn loo gudbin doona golaha wasiirada JSL.



Jamhuuriyadda Somaliland

**WASAARADDA GAADIIDKA  
IYO HORUMARINTA JIDADKA**

**MINISTRY OF TRANSPORT AND ROAD DEVELOPMENT**

**MARITIME TRANSPORT DEPARTMENT**

**CONSULTATIVE WORKSHOP ON  
MARITIME TRANSPORT DRAFT CODE**

**DATE: 05-06 SEPTEMBER, 2018**

## Mashruuca 16aad: Qalabka Xadidaada Xawaaraha Gaadiidka

Wasaaradda gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka si ay u wax uga qabato shilalka gaadiidka iyo dhibaataada naf iyo Maalba leh ee ay sababaan shilalka gaadiidku waxay keentay qalabka xadidaada xawaaraha gaadiidka rakaabka ah (vehicle speed governor) kaas oo lagu xidhay gaadiidka rakaabka, booyadaha, gaadiidka qaadka, iyo iskorogooyinka.

Mashruucaas oo wasaaradu ka daahfurtay magaaloooyinka Hargeysa, Berbera iyo Burco, kuwaas oo loogu talo galay in dhamaan gaadiidka wadanka lagaga xidho.

Madaxweyne ku xigeenka JSL, Mudane Cabdiraxmaan Cabdilaahi Ismaaciil (Saylici) ayaa mashruucaas si rasmi ah u daahfuray, isaga oo ku amray dhamaan dadweynaha JSL inay kala shaqeeyaan wasaarada dadaalka ay wado oo ay ku gacan siiyaan.



**Madaxweyne Kuxigeenka JSL Mudane C/raxmaan C/laahi Ismaaciil Saylici oo daah-furay qalabka xadidaada xawaaraha gaadiidka rakaabka ah (vehicle speed governor) iyo Wasiirka Gaadiidka oo Garb taagan.**



**Daah-furka qalabka xadidaada xawaaraha gaadiidka rakaabka ah (vehicle speed governor) oo ay ka soo qaybgaleen Madaxweyne Kuxigeenka, xubno ka mida golaha Wasiiradda, Agaasimayaal iyo Masuuliyiin kale**



**Gaadhi Bas ah oo ay leedahay Shirkadda Socdaalka ee Sahal oo lagu xidhaayo qalabka xadidaada xawaaraha gaadiidka rakaabka ah (vehicle speed governor)**



**Qaar ka mida ciidanka Nabadgalyada Waddooyinka oo ka soo qayb galay daah-furka qalabka xadidaada xawaaraha gaadiidka rakaabka ah (vehicle speed governor)**

## Mashruuca 17aad: Xeerka Waddo Marista (Wax ka bedel iyo Kaabis)

Xeerka waddo marista xeer L/r 56/2013, wuxuu ahaa xeer u baahan in dib u eegis iyo kaabis lagu sameeyo, isla markaana la waajafiyo siyaasadda wasaarada gaadiidka ee xakamaynta shilalka iyo badbaadada muwaadiintaiyo xeer nidaamiyaha madaxweynaha ee tirsigiisu yahay Lr.02/2018, sidaas darteed wasaaradu iyadoo maanka ku haysa yaraynta shilalka, iyo badqabka muwaadiniinta maal iyo moodba.

Wasaaradu waxay wax kabadel iyo kaabis ku samaysay xeerkan, kaas oo loo gudbin doono Golaha Wasiirada JSL si ay u ansixiyaan



# JAMHUURIYADDA SOMALILAND



## WASAARADDA GAADIIDKA IYO HORUMARINTA JIDADKA

### MINISTRY TRANSPORT AND ROAD DEVELOPMENT

### AQOON IS WAYDAARSIGA WAX KA BADALKA & KAABISTA XEERKA WADDO MARISTA GAADIIDKA LR'56/2013

Isniin

17-18-December-2018

8:00am

Jaamacadda Hargeisa

## Mashruuca 18aad: Tayaynta Shaqaalaha

Shaqaalaha wasaarada waxa kor loo qaaday aqoontooda iyada oo la siiyay tababaro ku saabsan habka iyo hanaanka ugu wanaagsan ee ay ugu adeegi karaan bulshada. Waxay waxbarasho Bilaasha oo heer jamacadeed ah helay 4 kamida shaqaalaha wasaarada kuwaas oo isugu jira 3 heerka labaad ee jamaacada baranaya (Master Degree or Postgraduate) halka 1 shaqaalaha ka mid ahina uu helay fursada jaamacada heerka koowaad (Degree of Human Resource)

Sidoo kale waxa loo qaybiyay shaqaalaha **kaadhadhka** aqoonsiga shaqaalaha ee ay hayada shaqaalaha dawlada ugu talo gashay shaqaalaha

Sidoo kale waxa lagu tababaray shaqaalaha wasaarada xeerka shaqaalaha dawlada xeer Lr.07/1996.



Wasiirka Gaadiidka, Agaasimaha Guud iyo Agaasime Waaxeedka W. Gaadiidka iyo H Jidadka



**Shaqale weynaha Wasaaradda Gaadiidka iyo horumarita Jidadk**



**Wasiirka Gaadiidka, Agaasimaha Guud iyo Agaasime Waaxeedka W. Gaadiidka iyo H Jidadka oo mid ka mida shaqalaha Shahaado siinaaya**

## Mashruuca 19aad: Qalabka la socodka Gaadiidka dawladda (GPRS)

Qalabka la socodka dhaq dhaqaaqa gaadiidka dawladdu waxa uu qayb ka yahay fulinta siyaasada gaadiidka dawladda, sidoo kale qalabkan waxa lagu maamuli doona dhaqdhaqaaqa gaadiidka dawlada xiliyada kabaxsan shaqada. Wasaaradu iyado ilaalinayasa tayada qalabkan casriga ah waxa ay si ku meel gaadha ugu bilaawday 10 gaadhi oo lagu tijaabinayo mudo hal bil ah si loo ogaado habka shaqo ee qalabka.



**Mid ka mida hawlwadeenada lagu tababaray inay gaadiidka dawladda ku xidhaan qalabka xadidaada xawaaraha gaadiidka Dawladda (vehicle speed governor)**



**Qalabka xadidaada xawaaraha gaadiidka Dawladda (vehicle speed governor)**



**Qalabka xadidaada xawaaraha gaadiidka Dawladda (vehicle speed governor)**



**Qaar ka mida Gaadiidka Dawladda oo algu xidhaayo Qalabka xadidaada xawaaraha gaadiidka Dawladda (vehicle speed governor)**



**Wasiirka Gaadiidka, Agaasimaha Guud, Agaasime Waaxeed W. Gaadiidka Wadayaasha Gaadiidka Dawladda oo ku sugan Daah-furka Qalabka xadidaada xawaaraha gaadiidka Dawladda (vehicle speed governor)**

## Mashruuca 20aad: Xuska Maalinta Caalamiga ah ee Badbaadada Waddooyinka

Wasaaraddu waxay markii ugu horeysay dalka oo dhan ka xustay ololaha caalamiga ah ee todobaka badbaadada waddooyinka oo labadii sannoba mar laga xuso dunida oo dhan, wasaaradu iyadoo kaashaneysa laamaha kala duwan ee dawlada iyo shirkadaha dalka waxa ay hirgalisay in toddobaad laga xuso dalka oo dhan. Muhiimada in dalka laga xuso todobadkan waxay ahayd in bulshada laga wacyigaliyo khatarta shilalka gaadiidka, iyo in la hubiyo ruqsada wadida gaadiidka iyo buugagta iyadoo laga hubineyey wixii been abuur ah iyo wixii ka khaldan wadayaasha gaadiidka.



**Xubno ka mida Golaha Wasiiradda Talye Kuxigeenka Ciidanka booliska iyo Dadweyne kale oo ku sugan xuska ololaha caalamiga ah ee todobaka badbaadada waddooyinka**



Gaadhi dhacay oo lagu xasusanaayo xuska ololaha caalamiga ah ee todobaka badbaadada wadooyinka

WASAARADA GAADIIDKA & HORUMARINTA JIDADKA

WASAARADA GAADIIDKA & HORUMARINTA JIDADKA

WASAARADA ARRIMAHA GUDAHA  
WASAARADA WARFAAFINTA  
WASAARADA WAKBARASHADA

MoED

**Todobaadka Badbaadada Wadooyinka  
Qaramada Midoobey ee Somaliland  
06<sup>th</sup> - 12<sup>th</sup> May 2019  
5<sup>th</sup> United Nations Road Safety Week**

Save Lives  
#SpeakUp

HASS PETROLEUM  
Dahabshiiil  
TAKAFUL INSURANCE OF AFRICA  
Telesom  
Horn of Africa Insurance  
WHO



Qaar k mida ciidanka Nabadgalyada Wadooyiinka oo ku sugan xuska ololaha caalamiga ah ee todobaka badbaadada wadooyinka

## Mashruuca: 21aad: Dhismaha Barxada Xarunta Waaxda Gaadiidka

Wasaaradda gaadiidka gaar ahaan Waaxda Gaadiidka & farsamada oo ah xarunta mustaqbalka dhaw laga hirgalin doono hoostada iyo geerashka lagu dayactirayo dhamman gaadiidka dawlada, ayaa waxa la dhigay asphalt (waddo laami ah) taas oo isku xidhi doonta qaybaha kala duwan ee waaxda.

Hawl qabadkan dhigista asphaltka xarunta waxa uu ka baaqday qorshihii sanadkii hore isla markaana waxay suurto gashay oo la dhamaystiray sanadkan gaar ahaan April- June.



**Barxada Xarunta Waaxda Gaadiidka, ee W. Gadiidka iyo horumarinta Jidadka**

## Mashruuca 22aad: Wacyigalinta Waddada Isku Xidha Hargaysa iyo Wajaale

Wasaaraddu iyadoo fulinaysa qorshaha ku aadan yaraynta waxyeelada shilalka gaadiidka waxa wacyigalin ballaadhan laga sameeyay sidii waddoyinka loo isticmaali laha si nabdoon iyo sidii khatarta gaadiidka looga taxadiri laha, wasaarada oo kaashanaysa Hay'ada GIZ ayaa wacyigalinta ka fuliyey magaaloyinka Hargeysa, Gebilay si bulshada aqoon dheerada ugu yeelato khatarta shilalka iyo sida looga taxadiri karo.



german cooperation  
DEUTSCHE ZUSAMMENARBEIT

JAMHURIYADDA SOMALILAND  
Wasaaradda Gaadiidka & Horumarka Jidadka

**Darawal iyo Rakaaba Isticmaal  
Suunka Gaadhiga**

Implemented by  
**giz**  
Deutsche Gesellschaft  
für Internationale  
Zusammenarbeit (GIZ) GmbH

RDA



# Ogsoonow Calaamadaha Waddada



Implemented by

**giz** Deutsche Gesellschaft für Internationale Zusammenarbeit (GIZ) GmbH





# JOOJI

## Isticmaalka Telefoonka Gacanta Markaad Gaadhiga Wado



Implemented by

**giz** Deutsche Gesellschaft  
für Internationale  
Zusammenarbeit (GIZ) GmbH





# Xakamaynta Xawaaraha Gaadhigu waa Ka Hortaga Shilalka



Basaska u kala goosha  
magaalooyinka iyo  
waddamada jaarka



Gaadiidka qaadka  
qaada



Dhammaan  
gaadiidka kale



Gaadiidka badeecadaha  
qaada



Booyadaha shidaalka  
ama biyaha qaada



Gudaha  
magaalooyinka



Biyo Mareennada

Implemented by

**giz** Deutsche Gesellschaft  
für Internationale  
Zusammenarbeit (GIZ) GmbH





JAMHUURIYADDA SOMALIILAND  
Wasaaradda Gaadiidka & Horumarka Jidadka



# Darawal iyo Rakaaba Isticmaal Suunka Gaadhiga



Implemented by

**giz** Deutsche Gesellschaft  
für Internationale  
Zusammenarbeit (GIZ) GmbH



## Mashruuca: 23aad: Dugsiga tababarka wadayaasha/macalimiinta wadayaasha.

Wasaaraddu waxay si rasmiya u furtay iskuul lagu Tababari doono darawaliinta Dawlada sidoo kalana lagu Tababari doono Macalimiinta iskuulada Barashada Baabuurta ee Gobollada dalka oo dhan si loo helo darawalin tayo iyo xirfad u leh wadida gaadiidka isla markana loo xoojiyo aqoonta Darawalada Gaadiidka dawlada.

Wasaaradu waxa ay wax kabadal iyo kaabis ku sameysay Buuga Imtaaxanka Qaadashada Liisanka oo horey daabacadiisi koowad loo soo saray, buugan oo waajib ku ah qof kasta oo qaadanaya liisan in uu barto isla markana wasaaradu imtaaxan kaga qaado ayaa waxa la soo saaray dabacadiisi 2aad kana kooban yahay 13 Cutub.

Wasaarada gaadiidka iyo horumarinta jidadku waxay casriyayn ku samaysay liisanka darawalinimda gaadiidka dawlada, oo ah mid laf ah, lehna dhamaan waxyaabaha lagu, ilaaliyo been abuurka (Security features) kaas oo la siin doono dhamaan darawaliinta gaadiidka dawlada marka ay dhamaystaan tababarka iskuulka, isla markaana ay ka gudbaan imtixaanka casriga ah ee wadayaasha gaadiidka loo diyaariyay.



**Xubno ka mida Golaha Wasiiradda Agaasimeyaal iyo masuuliyiin kale oo ku sugan munaasibada daah-furka Dugsiga tababarka wadayaasha/macalimiinta wadayaasha.**



**Madasha Munasibada Daah-furka Dugsiga tababarka wadayaasha/macalimiinta wadayaasha.**



**Agaasimaha Waaxda Liisamada, Buuga iyo Taarikada oo ka hadlaysa Munaasibada Daah-furka Dugsiga tababarka wadayaasha/macalimiinta wadayaasha.**



**Agaasimaha Waaxda Gadiidka oo ka hadlaaya Munaasibada Daah-furka Dugsiga tababarka wadayaasha/macalimiinta wadayaash**

## Mashruuca: 24aad: Dayactirka Biriishka 2aad ee Magaalada Burco

Wasaaradda waxay Qiimayn ku samaysay waxyeelada uu leeg yahay khasaaraha soo gaadhay Biriishka Burco oo roobabkii waxyeelo ugeysteen, qiimeeyn kadib waxay wasaaraddu qandaraas daah furnaan leh ku bixisay dayac tirka biriishka Burco.



© Communication Office of the MoRTD, Somaliland.

**Biriishka 2aad ee Magaalada Burco Dushiisa**



**Biriishka 2aad ee Magaaladda Burco hoostiisa**



**Biriishka 2aad ee Magaaladda Burco hoostiisa**

## Mashruuca 25aad: Xasuusta Malinta Caalmiga Ah Ee Dadka Shilalka Gaadiidku Ku Waxyeelobay.

Maalinta Caalamiga ah ee xasuusta dadka kuwaxyeelobay shilalka waddooyinka oo sannad walba la qabto taariikhdu marka ay tahay 17 November, ayaa si weyn looga xusay magaalooyinka waaweyn ee dalka Jamhuuriyadda Somaliland. Xuskan oo ay soo qabanqaabisay Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka Somaliland, waxa lagu qabtay magaalooyinka waaweyn ee Hargeysa, Burco, Boorama, Laascaanood iyo Berbera, iyadoo halkaas lagu soo bandhigay shilalka kala duwan ee ka dhacay dalka Somaliland iyo khasaaraha ka dhashayba.



### WASAARADDA GAADIIDKA & HORUMARINTA JIDADKA



## MAALINTA CAALAMIGA AH EE XASUUSTA DADKA KU WAX YEELOBAY SHILALKA WADDOOYINKA



**WORLD DAY  
OF REMEMBRANCE**  
FOR ROAD TRAFFIC VICTIMS

**17<sup>th</sup> NOVEMBER  
2019**



Munaasibada xuska, xasuusta dadka kuwaxyeelobay shilalka waddooyinka ee 17 November



**Wasiir Ku xigeen W. Gaadiidka Agaasimayaasha Guud ee Gaadidka iyo Waxbarshada, Badhasaabka Hargaysa oo ku sugan Munaasibada xuska, xasuusta dadka kuwaxyeelobay shilalka waddooyinka ee 17 November**



**Wasiir Ku xigeen W. Gaadiidka Agaasimaha Guud ee Gaadidka iyo, Badhasaabka Gobolka Maroodijeex oo shahaado ku gudoonsiinaya Roobbe Munaasibada xuska, xasuusta dadka kuwaxyeelobay shilalka waddooyinka ee 17 November**



**Wasiir Ku xigeen W. Gaadiidka Agaasimaha Guud ee Gaadidka iyo, Badhasaabka Gobolka Maroodijeex oo shahaado ku gudoonsiinaya Agaasimaha Waaxda Qorshaynta ee W. Gaadiidka, Munaasibada xuska, xasuusta dadka kuwaxyeelobay shilalka waddooyinka ee 17 November**